TIIRAANYADA NOLOSHAYDA

Social Media ayaa loo yaqaanaa haddaan af soomaaliyeenana waxaan dhihi lahaa Warbaahinta bulshada. Laga yaabee in si ka qurux badan sidan aad u dhigi lahayd waasa sida ay ila noqotay, waad iga sixi kartaa si ka wanaagsan sida aan u dhigay haddaad hayso.

Faaiidooyin badan ayey leedahay runtii warbaahinta bulshada, intaas oo malaayiin ayaa maanta qoys ku noqday, intaas oo riya ku nool ahaydna maanta riyadooda waa u rumowday, sidaas si la mid ah sida ay wax walba u leeyihiin nacfi iyo qasaaro labada dhinacba waa leedahay ayaa la dhihi karaa, waxay ku xirantahay uun sida uu qof walba dhinacyadeeda kala gadisan u isticmaalo.

Waxay ahayd subax Axad ah, subaxda axadda qaybteeda hore waxaa jirta meel aan ka qaxweeyo kuna diyaarsado qoraalada aan idinla wadaago. Dhowr subax ayey isheenu



isku dhacday iyada oo la socota nin ay meeshaas ka wada shaahaan.

Waan dareemi karay in qofkan aysan ahayn qof degaan ku ah Nairobi marka aan wax ku qayaaso qaabka labiskeeda iyo erayada ingariiska ah ee ay u adeegsanaysay shaqaalaha ka adeegayay goobtaas.

Saaka subaxyada kale waa ka duwanayd aniga sida ii caadada ah meel gees ah oo xoogaa ka fog dadka ayaan fadhiisan jiray si dareenkayga guud aan ugu soo xaadiriyo qormooyinka aan diyaariyo subax walba oo axad ah.

Aniga oo ku foorara shaashaddayda qoraalka ayaan ka war helay qof igu salaamaya salaanta islaamka isla markaana iga codsanaya in bal uu fadhiisan karo kursiga iga soo horjeeda waydiin ay ka horaysiisay in qof kale ila fadhiyo iyo in kale.

Iguma cusbayn muuqaalka qofkan haweenayda ah oo subaxyada axadda qaar waan arki jiray iyada oo la socoto nin markaa Da' dhaxaad ahaa, goobta waa Java coffe parkland Nairobi.

Waa qof quruxoon oo ladan runtii, dhaqaalahana uu ka muuqdo, cod macaan oo codka naxariista aan u aqaana lahayd.
Si asluubaysan oo wanaag iyo qaddarin ka muuqato ayey ii salaantay, waan dareemi karay in saaka ay kaligeed ahayd doonaysayna in ay wax badan iga ogaato, maadaama ay dhowr subax igu aragtay qaybtan aan ka fadhiisto maqaayaddan ee geeska ah.

Goobta aan u xushay waxay ahayd goob dugaal ah oo xoogaa yara ka dhex baxsan kuraasta isku dhaw ee maqaayadda, waa goob daganaan aan ku dareemayay buuquna uu ku yaraa. Kadib codsigii iyo waydiintii ay i waydiisay in ay fadhiisan karto ayaan ku iri waad fadhiisan kartaa walaal, aniga oo ka walwalsanaa qaab qoraalka iga qasmayay, maadaama saaka sheeko aanan kusoo tala galin ay qofkan i galin doonto.
“Magacayga waa Hibo” ayey ku bilowday, anigana waxaan ugu jawaab celshay “Maxamed”.
“Barasho wanaagsan maxamed, waad iga raali noqonaysaa saaka, waana ka cudur daaranayaa qasidda aan kaa qasayo

qoraalkaaga”.

“Raali ahaanshaha waa lagaa aqbalay marba haddaad ogtahay waxa aad samaynayso ayaan ugu kaftan celshay” aniga soo laabayo shaashadda Computerkayga.

Sheeko is barasho iyo shaahayn ah ayaa meesha kuwada qaybsanay, iyada oo waydiinteeda ay u badnayd in ay wax badan ka ogaato shaqsiyaddayda iyo waxa aan ahay.

Si hufan oo daldalool aan lahayn ayaan su’aal walba jawaabteeda u siinayay iyaduna waxay muujinaysay in ay iga qanacsantahay. Dhoola caddaynteeda waa badnayd, waana dareemayay saaka in kulankan ay ila yeelanayso ay kusoo tala gashay, maxaa yeelay, qacdii ay soo gashayba waxaan arkayay iyada oo toos u soo abaartay dhinac aan maqaayadda ka fadhiyay.

Waydiimo badan oo u badnaa wax ka ogaanshiyaha shaqsiyaddayda kadib ayey markii dambe dulucda ujeedada usoo daadagtay iyada oo i waydiinaysa in aan ahay Qoraa iyo in kale?

Waxaan ku iri dunidayda marka laga eego wax waan qoraa balse iskuma tilmaami lahayn Qoraa, waxse waan xar xariiqaa.



Iyada oo muujinaysa in ay aqoon dhinaca warbaahinta bulshada ii leedahay ayey igu tiri dabcan waan kaa warqabaa oo aqoon waan kuu leeyahay marka laga eego dhinacyada warbaahinta bulshada muddo ka badan 3 sano ayaana ku aqiin. Tan iyo markii aan kugu arkay maqaayadda waydiimaha aan is waydiinayay waxay ahayeen xagee ku arki jirtay wajigan maba kugu cusbee?

Waan baqayay runtii dhowr subax ayaana damcay in aan kusoo dhiirado in aan kula hadlo oo ku waydiiyo in aad tahay qofka aan filayo. Dabcan haa, sabab kalana waan jirtay oo qofka ila socday wuxuu ahaa wadaadkayga, dhawaan ayaanu nimid Kenya howlo ganacsi oo dhanka Guryaha ayaana u nimid, marti ayaanu ku nahay meesha, ka raali noqo Maxamed fudaydkayga balse, waxa aan samaynayo waan ogahay sidoo kale ujeedada aan leeyahayna in gaari doono ayaan filayaa.

Aniga oo xooga muujinaya dhoola caddayn xageedana eegaya ayaan ku iri “saaka xaalku ma sahlana waan maxkamadaysnahay ayaan filaa”?



Maxkmad ma jirto eyey iigu laab dajisay iyada oo dhahayso Maxamed Muusa Sh Noor, aqoon gaar ah kuuma lahayn balse hawadaas ayaan kaa aqiin oo waan jeclaa mar in aan ku arko, ismase dhaheen jawigan iyo halkan ayaad isku arki doontaan, waxaaba filayay in waddadamada yurub mid ka mid ah aad ku nooshahay oo halkaa aad degaan ku tahay.

Waxay daba socotay barashada aan baxshay oo ku qeexay in aan halkan daganahay kana shaqaysto reerna ku leeyahay.

“Maxamadow in aad qoraa isku tilmaantana diiday, waasa kuu yeelay taada ah in aad wax xar xariiqdo, waxaan jeclaan lahaa in aan noloshayda wax ka xariiqdo, sababta aan u doortayna in aadan i waydiin ayaan jeclaan lahaa. Inta aanan sheekada kuu bilaabin codsi gaar ah ayaan ka hormarinayaa, Waddanka dhabta ah ee aan ku noolahay sheekadana ka dhacday ma sheegi kartid meelaha qaar ee sheekada oo laga fahmi karo in aan aniga ahay waad baddalaysaa”.

Waan ku fahmay ayaan iri, balse su’aal ayaan ku waydiinayaa ah maxaad ku dooratay in aad aniga ila wadaagto dhacdo ka mid ah dhacdooyinka noloshaada,

maxaasa ka baqanaysaa marba haddaad dooratay in la soo bandhigo Qisada kugu dhacday?

Jawaab aan ku qanco oo fahmi karay ayey i siisay,waana ka aqbalay runtii dhamaan inta ay iga codsatay marba haddii waxa la qarinayo aysan ahayn qaabka ay qisada ku dhacday balse ay tahay tilmaamo lagu garan karo iyada iyo inta sheekada qusayso iyo goobaha ay ku noolaayeen.

Dabcan haddii xitaa aysan iiga cudur daara lahayn ma sheegeen oo qaabka wax aan u qoro ayey ka mid tahay in aan ilaalsho waxa qofka wax u dhibi kara shaqsiyaddiisa. Marka aqristayaal Qisada ayaa ina qusaysa ee ka raali noqda codsiga ay ii soo jeedisay gabadha qisadeena ku socoto iyo anigaba, aniga oo isku dayi doona ilaa xad inta aan qorma ahaan idin qancin karo in aan idinka qanciyo, nuxurka sheekadana aan la waxyeelayn doonin.

Hadaba aqriste sheeka walba qaab ayey ku bilaabataa, qaabna waa loo doortaa qoraalkeeda. Sheeka waa laga sheekeeyaa, midna qofka ay ku dhacday ayaa la isku ekeesiyaa, mid kalana si waraysi camal ah ayaa loo qoraa,

midna qofka ay ku socoto ayaa loo dooyaa ka hadalkeeda. Anigana waxaan doortay in sheekada gabadha ay ku dhacday ay nooga sheekayso maadama dareen culus uu iiga muuqday, una ekayd qof doonayay in ay iska dajiso culays badan oo saaran, hadaba yaanan idinla fogaan, Hibo aan u daayo sida ay wax ugu dhaceen.

Tiiraanyada noloshayda ayey ku bilaawday, isla markiin uu afkeeda eraygaas ka soo baxayna way ceshan wayday ilmada, tiish ii dhawaa ayaan siiyay kuna dhahay “hoo, is adkee, in aad tiiraanayada noloshaada ila wadaagto sharaf ayey ii tahay” sidaas ayaana u doortay magaca sheekada.

Hibo oo xoogaa is adkaynaysa ayaa hadalkeeda ku bilowday sidan.
” waxaan ahaa ahayna ilaa hadda gabadha kaliya ee aabahay iyo hooyaday ay dunida awlaad ahaan ka tirsadaan. Hooyadey iyo aabahay aniga oo yar ayuu calafkoodu kala dhamaaday oo kala tageen, hooyadey ayaana la joogi jiray oo isoo korsatay aabahayna wuu igu dhaqaalayn

Hooyadey iyo aabahay aniga oo yar ayuu calafkoodu kala dhamaaday oo kala tageen, hooyadey ayaana la joogi jiray oo isoo korsatay aabahayna wuu igu dhaqaalayn jiray halkaa.

Xaaladdayda nololeed sidaas ayey ahayd, dadka sida badan igu xeeran ee iga warqabay waxay ahaayeen reer abtiyaashey oo si wanaagsan aan ugu dhex jiray.

Sanadku waa 1988 waa xilligii dadku ay bilaabeen in ay dibadaha u baxaan, abtigey iyo qiyskiisa oo Nairobi u baxayeen ayaa la igu daray sidaana qoyskooda uga mid noqday.

Muddo sanad ah kadib abtigey iyo qoyskiisa safar ay ku aadayeen yurub ayaan qayb ka noqday balse aniga kaligey ayaa dhaxda la iga soo celshay kadib markii in aanan qoyska ka mid ahayn la ii sababeeyay, ha yeeshee abtigey ayaa diiday oo isku qasbay in kaligey aan la i celin oo isagu ila soo laabto.

Nairobi ayaan dib ugu soo laabanay muddo markii aan joogay ayuu zakariye oo aan ilma adeer ahayn ila soo

xiriiray. Zakariye ilaa yaraanteeni ayaan is naqiin, isagu wuxuu nasiib u yeeshay in uu ka mid noqdo soomaalida Kanada horey u gashay.

Sheeko iyo shukaansi xiriir ah ayaa inoo bilaabatay dhowr jeer ayuu ballamo badan ii qaaday ahayd in uu i guursanayo iina qaadayo xagaa iyo kanada balse waxba kama suura galin.

Muddo markaan kenya joogay sanadkuna uu sii marayo 1989 ayuu abtigey oo awalba dartey usoo laabtay balse markii dambe qoyskiisa kula biiray Swedan ayaa igu wargalshay in aan iska xaadiriyo xagaa iyo Dara salaam Tanzania si aan halkaas uga soo dhoofo.

Mahad alle ayey u sugnaatay ajar iyo khayr aan la soo koobi karina allaha ka siiyo, abtigey wuu ku guulaystay damiciisa ahaa in uu mar labaad igu celsho yurub sidaana aan kula midoobi qoyska abtigey mar kale, waxaasa dhanka dhaqaalaha qayb wayn ku lahaa aabahay oo aan dhihi lahaa hadduusan isagu ahaan lahayn waxba ma suuraabeen isagana xusuustayda kama ga'o. Balse aan dib idiin

xusuusiyo in aan labada dhinac ee waalidiintaydaba aan ka ahaa qofka kaliya ee a wada fiirsanayeen.

Aabahey xaasas kale wuu lahaa balse Alle kuma guulayn in uu wax ka siiyo sidoo kale hooyadey iyana guur kala duwan waa samaysay iyana Alle wax kama siin.

Xiriirka aniga iyo zakariye inaga dhaxeeyay marba marka ka dambaysa caadaas ayuu marayay, wuxuu ii muujin jiray in uu ahaa nin naxariis badan, deeqsi ah, i dhagaysta, i fahma, igu kalsoon, kalsoonina iga keensaday.

Kadib markii aan Swedan imid oo xoogaa aan joogay sharcigiina qaatay ayuu dhacay guurkeena aadka loogu wada farxay maadaama laba wada dhalatay ay na kala dhaleen aabahay iyo aabihiisna ay ahaayeen laba Da' oo isku xigta isna jecel.

Riya wanaagsan in ay ii rumowday ayaan u haystay noloshaydana dhanka quruxda badan ee aan ku riyoon jiray ayay jihada saartay.



Xaalkaygu xaal farxadeed ayuu ahaa, nolosha macaankeeda dhadhan dhabxanagayga aan ku haysto ayey ahayd oo xilliga aan rabo aan dhdhansan karo.

Iftiinka nolosha marka uu kuu soo muuqdo mugdina aad ku jirto waxa kaliya aad ka fakarayso ayaa noqonaya sida iftiinkaas aad ku heli lahayd, mugdiga noloshayda ku jirtayna wuxuu ahaa in aan kaligey dunidan ku ahaa oo iftiin aan u ahaa waalidkayga balse walaal iyo cid aan waheshado marka laga reebo qoyska abtigey ma jirin, sidaa darteed, zakariye wuxuu ii ahaa iftiin ii soo muuqday oo aan u xiisa qabay in aan mugdiga uga baxo.

In aan qoys yeesho isagana xaas u noqdo farxad ayey ahayd aan ku sugan karo inta aan ka gaarayo hammigayga kale ee nolosha oo ahaa in aan hooyo noqdo waliba hooyo barbaariso ubad ay kuwada faraxsan yihiin iyada iyo saygeeda.

Maalmihii farxadda, raaxada iyo rayn raynta ayaan kuwada jirnay, Swedan ayuu arooskeena ka dhacay aroos waliba aad

loo soo agaasimaya laguna wada faraxsanaa aadna loogu soobaxay looguna sacab tumay.

Waxay ahayd subaxnimo aroornimo ah oo aan u wada soconay meel, xaafaddu waa Teneast Stockholm, cimiladu waa mid cadha badan oo qabow ku diiranaya xanfarna wata leh.

Qof walba gacmaha uyuu jeebabka jaakadaha waaween aan wadanay kula jiray, si nabdaysan ayaan uga soo baxnay gurigeena, aniga ayaa meel u socday isaguna wuu i wahelinayay Uur markaa yarna waan lahaa.
Sida sheekada ay noogu socotay baan mar kaliya is qabanay kadib markii uu ka carooday eray aan si kaftan ah u dhahay balse isaga meel xun ka taabtay oo uu la xanuunsaday.

Aniga kaftan ayey iga ahayd, ma ahayn wax aan isaga ula jeeday oo is lahaa ku dhaawac, laakin isaga si xun in uu ugu dhaawacmay ayuu muujiyay, la yaabkayguna wuxuu ahaa markii uu kari waayay in uu ila gaaro halkii aan u soconay oo gadaal uu iiga laabtay isaga oo ka cudur daaranaya in uusan ila sii socon karin.



Waa subaxaas subaxa ay bilaabatay musiibada dhibaatada salfan doonta qoyskayga, eray aan afkayga ka dhahay oo aanan ula dan lahayn in aan isaga ku dhaawaco ayaana sababasaday.

Wixii markaa ka dambeeyay qoyskayga xaaladdiisa ma daganayn ilaa saddex caruur ah ayaan ku dhalay muranka subaxaa bilowday.

Xaaladda qoyskeyga xaalad dagan ma aysan ahayn, dagaal, buuq, calool xumo iyo oohin qanaaco darro ii sii dheertahay ayaan ku jiray. Dhowr jeer ayaa garteena la galay, qaladku xagiisa ayuu ahaa mar walba oo aniga waxaan ahaa dulmanaha la dulmiyo, waa sida ay xaqiiqdu tahay, aniga waa la igu eedi karay af xumo ama hadal xumo iga timaada marka ay xaaladdu igu kululaato.

Sidaas ay tahay marnaba iguma soo dhacsanayn in aan kala tagno ninkayga, balse in ay wax qaldan yihiin waan ku jiifay,

dareen ah in meel dheer aanan wada gaari karina mar walba waan qabay.

Xumaatooyin badan oo aanan mid mid u sheegi karin ayuu igula kacayay balse intaas oo dhan waxaan ugu sabrayay jacaylkiisa oo wali igu dhex noolaa kaas oo i siinayay enerjiga in aan iska adkaysto oohintana nafis joogta ah oo caawin ii ah bey ahayd.

Qiimaha nolosha quruxdeeda waa in aad qanacsantahay, faraxsantahay, hammi aad ilaashanayso ama is leedahay gaarna aad leedahay intaas oo dhan marka hore waan haystay balse in ay si tartiib ah iiga sii lumayaan ayaan sii arkayay.

9

Qoraxda marka ay soo baxdo walwalka aan qabo ayaa ahaa talow maanta jawiga siduu noqon doonaa, ma dagaal iyo

murugo ayaad maantana marti u noqon doontaan? waxaas oo aragagax ah waxaa ii sii dheera caruurta oo isku xig xigtay oo waxba aana kala waynayan, buuqooda dhinac kale ayuu dabka igu shidan ka sii basinayay.

Is waydiin badan ayaa igu jirtay taas oo ahayd waxa ku dhacay Zakariye ee sidan uu iigu silcinayo, maxaan geystay, miyaanan dumar ahaan ugu filanayn, ma aniga ayaa isaga wax gooni ah ka qaba ama ka qaatay, waa maxay murankan iyo nacaybka joogtada ah ee iigula kacayo, xitaa mararka qaar gacan qaad ayuu igula kici jiray.

Waan xasuustaa subax aniga oo jikada ku jira quraacna u samaynaya intuu jikada iigu soo galay igu yiri arag sida aad u taalo, uf ayaa tahay uma qalantid in aad naag ii noqoto, waad iga soo booday waana ku dhibsaday.

Subaxaas ayey ahayd subixii aan si toos ah ula hadlay oo ku dhahay ” haddaanan naagtaada u qalmin gurigan maxaad ka



samaynaysaa isaga bax” goobtu waa Sweden, gurigana waa gurigayga, waan ugu dulqaadanayay xadgudub badan iyo gacan qaad balse saaka xadka ayuu i gaarsiiyay.

Wixii maalintaa ka dambeeyay xoogaa dib ayuu iiga dagay maslaxo ayuu la yimid, muddo ayaan daganaan aan caga badan ku taagnayn kuwada noolayn.

Wuxuu ku laabtay Canada, muddo markuu naga maqnaa ayuu inoo yimid markana la yimid soo jeedin ahayd in aan xagaa isugu wareegno sidii ayaana uga ogolaaday, balse maadaama aanan sharci wayn ku lahayn Swedan waxaan ku qasbanaa in aan Canada ku tago dacwo uu ii dacwoonayo.

Waxaa jirtay in hooyadey iyo ilma abtigey dhalay aan leen u xareeyay kaas oo aan suura galin, aniga oo ka xun in hooyadey oo kaligey i dhashay aan ku guul darraystay in ay mar labaad nolol ahaan igu soo biirto ayaa waxaa dhacday in

dacwadeeni Canada sidaa lagu aqbalo dhamaanteena sidaas aan ugu wada guurno Canada.

Nolol cusub oo ka adag tii swedanta aan ku aqiin ayaa ii bilaabatay, markan xeradiisa ayaan ku jiraa, gurigana waa kiisa, wax walba isaga ayaa ah, aniga marti ayaan ku ahay beledkan cid aan isaga ahayna kama aqaan, buuqii iyo balaayadii aan muddada yar ka nastay dib ayuu noogu bilowday, isla buuqaas ayaan 2 caruur ah oo kale ku dhalay.

Nolol dulli ah ayaan ku noolaay, waxaan is lahaa iska dulqaado inta sharciga aad ka helayso, nasiib wanaagna aniga oo ay wehel ii tahay oohinta aan ku nafiso ayaan sharcigii helay kadibna waxaan go'aansaday in aan dib ugu laabto muddo gaaban Swedan kadib markii aan soo laabanay aniga iyo caruurtayda ayuu muddo kadib naga daba yimid, buuqeena wuu sii batay, garteena waa lagu daalay, anaga ma nasano, nolol ma haysano, isaga wuu



cabanayaa,aniga waan cabanayaa, cid caafimaad qabta ma jirin.

Subax ka mid ah subaxyada anaga oo qabowga ka gabanayno ayuu baasabooradii caruurta iyo kaygiiba naga qaatay, wuxuu la aaday talyaaniga oo walaashiis iyo caruurteeda swedan kusoo galiyay, aad ayaan uga xumaaday runtii in uusan arriintaa igala tashan, buuq iyo dagaal aad u baaxad wayn ayaa arrintaas ka dhalatay, taas oo keentay in markan aan ku sigano in aan kala tagno.

Nabad ma jirin mar walba ee buuqeena baaxaddiisa ayaa weynayd, waa kan maalintii dambe 3da waaween iskoolka ka watay lana aaday Canada aniga oo ogayn, maalin xun ayey ii ahayd, aad ayaan u walwalsanaa oo cidda ilmahayga qaadatay ayaan la yaabanaa, balse markii uu soo hoyan waayay habeenkii ayaan fahmay in uu isgaa la tagay, 3 maalin kadibna warqad furriin ah ayuu ii soo diray.



Xaalad aan aqbali karo ma ahayn, waxaan ka daba aaday Canada, guri aan ku dago ma jirin mana ku lahayn, wax walba isaga ayey ku qornaayeen, rafaad badan ayaan u maray sida aan ilmahayga ku heli lahaa, oo dacwad dheer ayuu i galshay.

Dad aan macrifa ahayn ayaa dhexda ii xirtay oo ila dadaalay, marka hore degaan ayaan yeeshay marka xigana ilmahayga ayaa dib la iigu soo celshay.

Rafaadka iyo riinka buuqa noloshayda intaas kuma ekayn, xaaladdu waxay ka sii dartay markii uu ku dhawaaqay kuna dhaartay in uusan dhamaan ilmaha iga dhalin oo ay Xaaraan ka yihiin.

Sharaftayda ayuu xumeeyay, wax aanan ahayn in aan noqdana aana ku fakrin ayuu iga dhigay iguna tilmaamay.



Xaaladda ayaa igu cuslaatay, ma ahayn qof shaqo taqaan, mana ahayn qof guriga ka baxdo, waxaan ahaa Xaas guri joogta ah oo ilmaheeda iska korsata dulmina ku nool oo ninka in uu sharafteeda iyo nolosheedaba difaaco la rabay isaga lagu soo taagay.

Xaalad murugo ayey runtii ii ahayd, xaalad xun ayaan dhex galay, waqti adag ayaa ii bilowday. Aniga tayda kama walwalsanayn ee tan ilmaha aabahood igu inkiray ayaan ka walwalsnaa, Alle mahdiise ma ahayn guurkayga guur qarsoon in ilmaha isaga uu iga dhalay aniga iyo inta na taqaanba waan wada ogayn warkiisa cid dhag u jalaqsiisay ma jirin. Qof walba oo qoyska ka mid ah dhakafaar ayuu arrintaas ka qaaday, dhacdo lala ashaqaraaro ayey ahayd runtii.

Isaga baladka wuu ka tagay xumaan daran uu ii geystay kadib, wuxuu u gudbay dhankaa iyo America, halkaas oo uu

ka shaqa bilaabay dhowr dumar ahna uu ku guursaday mid u nagaatayse ma jirin.

Waa sida ay tahay uma darsan, nolosheenuna waa socotay hal habeena gaajo kuma wada seexan muuqaal ahaana dadka kama liidin, isaga ayaa wax isku dhibay ee inaga heer sare ayaan ahayn.

Noloshiisa ma ahayn mid dagan maalinba naag cusub ayuu guursanayay wax u tarmana ma jirin, buuq iyo iska daba wareeg ayuu ku noolaa.

Caafimaad ahaan wuu sii liidanayay oo isku buuq ayaa ku dhacay, sokor iyo dhiig karna waa ugu darsanayd.

Xagayga wax walba sida loogu tala galay ayey iigu socdeen, jismi ahaan waan soo laabtay, quruxdayda ayaa mar kale sideedi kusoo noqotay, magaalada waxa rag jooga inta

badan xiriiro ayey ila sameenayeen balse niyad ahaan in aan qaabilo uma diyaarsanayn.

Waxaa jiray wiil dhalinyara ahaa oo magaalada aad iigu soo dhaweeyay xitaa caruurta in iskuul islaami ah ay galaan qayb weyn ku lahaa, marka hore facaal khayr ayey ka ahayd oo wax dan gaar ah igama lahayn anigana kama lahayn.

Runtii waxaa la dhihi karay wuxuu ahaa qof Alle ii soo diray oo u taagnaa sida uu ii gacan qaban lahaa, waligey wax walba oo aan doono inta aanan ficil ahaan u raadsan ayuu iga caawin jiray.

Waa dambe ayuu guursaday anigana guurkiisa waan u gurmaday oo qaybtii aan uga aadanaa waa ka qaatay, nasiib darrase uma aflixin guurkaas, oo muddo kooban kadib waa ay kala tageen isaga iyo gabadhii.

Damac gooni ah ayaa igu dhashay oo waxaan dareen jacayl u qaaday wiillkaa balse waxba uma sheegin oo waan ka xishoonayay runtii, laakin si walba uu ku fahmi karo dareenkayga waan u muujinayay ugu dambayna wuu i fahmay isaga ayaana markii dambe wax ii soo bandhigay anigana awalba meel dheer kama jirin waan aqbalay isla markiiba.

Muddo dheer naguma qaad in aan isla fahano in guur aan u wada baahanahay wax yar kadibna waan is guursanay, Alle mahadii wax walba sidii loogu tala galay ayey noogu socdeen saddex caruur ah ayaan u dhalay, laba wada jir nolosha isaga waheshato ayaanu noqonay.

Hadda waa i kan, maanta Alle hanti iyo dadba wuu i siiyay, nin wanaagsan oo ku qanacaanahayna marwadiisa waan ahay nimco Alle ayaan isaga jiraa runtii.

Qiimaha nolosha ayuu i baray ayaan dhihi karaa, la noolaantiisa daganaan iyo farxad ayaan ka qaaday. Sanadkii la soo dhaafayay ayey ahayd markii aan Cimrada ka wada nimid, layaabkuse wuxuu ahaa markii telefon lama filaan ah aan ka helay ilmahayga aabahood oo iga codsanayo in aan iska cafiyo maadaama uu qalad wayn ka galay ilmaha iyo anigaba, waxba in aanan u qabin ayaan u sheegay oo waa horeba iska cafiyay.

Intaas kadib ayuu i waydiiyay bal haddii aan xoogaa dhaqaala ah ku caawin karo maadaama ay nolosha ku adagtahay? Waan siiyay runtii inta uu i waydiistay, marba haddaysan ahayn wax sidaa ii cusleynayay.

In uu ahaa ninka ilmaha igu inkiray ka sokow hadana ma hilmaansanayn in uu ahaa ilmahayga aabahood iyo walaalkey adeerkay dhalay, xiriirkaas ayaan ku xiriirinayay uguna sabrayay, waa tiiraanyada noloshayd.



Dhammaad

Qore: Mohamed Musa Sh. Noor

